

COVID Connect 2


Waxaa farxad weyn noo ah in aan kugu wargelino in aan qeyb ka nahay habka cusub ee baarista COVID-19 ee Wisconsin Department of Health Services (Waxda Adeegyada Caafimaadka ee Wisconsin): COVID Connect 2.


Waa maxay COVID Connect 2?

Sidii uu ahaa barnaamijki hore ee COVID Connect, COVID Connect 2 waxa loogu talagalay in dadka loogu fududeeyo diiwaangelinta baarista COVID-19 iyo ogeysiinta natiijooyinka. Qaar ka mid ah waxyaabaha cusub waxaa ka mid ah:

- **Diwaangelin ah hal mar**, looma baahna in la isku diiwaan geliyo baaris kasta.
- Waalidiinta/masuulka **waxay arki karaan natiijada baarista ilmahooda** oo kadinkooda ayey ku xiranayaan kadinka ilmahooda.
- **Qof kasta oo la baaro waxa uu natiijada ku heli doonaa kadinka intarnetka**, oo waxaa si toos ah looga helayaa COVID Connect 2 ka dib jawaabta shaybaarka.


Waxa Xiga

 <p>Sawiro calaamadda QR code ama isticmaal barta intarnetka ee URL si aad u gasho.</p>	 <p>Sameyso kadinka intarnetka.</p>	 <p>Sameyso kadinka intarnetka ee ilmahaaga.</p>	 <p>Isticmaal kadinkaaga si aad u aragto natiijooyinka baarista qoyskaaga.</p>
----------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------	------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------	--------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------	---------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------



Sameyso kadinkaaga intarnetka.

- Booqo bogga COVID Connect 2.
- Guji “Create an Account” (Sameyso Kadinka Intarnetka) oo ku qoran qeybta hoose ee bogga.
- Guji batoonka “Self” (Nafteyda) si aad u sameysato kadinkaaga intarnetka.
- Sameyso username (summadda) iyo password (fureha) kadinkaaga.
- Raac tilmaamaha aad wax ugu dari karto macluumaadka diiwaangelintaada.
- Ka dib markaad saxiixdo oggolaanshaha, waxaad arki doontaa macluumaadkaaga. Guji “Register” (Is-diiwaangeli) si aad u sameysato kadinkaaga intarnetka oo u gudub faahfaahinta.
- Guji astaanta isticmaalaha ee ka muuqata qeybta midigta sare si aad uga baxdo.



<https://covidconnect2.wi.gov/#/login>

COVID Connect 2





Sameyso kadinka internetka ee ilmahaaga

Raac tilmaamaha kor ku qoran si aad u sameysato kadinkaaga COVID Connect 2 ka hor inta aadan sameysan kadinka ilmahaaga.

- Mar kale booqo bogga COVID Connect 2.
- Guji “Create an Account” (Sameyso Kadinka Internetka) oo aad ka heleysa qeybta hoose ee bogga.
- Guji batoonka “Someone Else” (Qof Kale) si aad u sameysato kadinka ilmahaaga.
- Guji batoonka tilmaamaya in aad leedahay Kadinka Covid Connect 2. Ku gal username (summaddaada) iyo password (furehaaga).
- Ku qor macluumaadka ilmahaaga si aad ugu sameysato kadinkooda internetka.
- Shaashadda ku saxiix (e-sign) oggolaanshaha iyo foomamka caddeynta.
- Mar kale sidaas samee si aad kadin ugu sameyso carruur kale haddii ay kuu joogaan.

Isticmaal kadinka internetka si aad u aragto natiijooyinka baarista qoyskaaga.

Xaqiijin ah in aad sameysay kadin internetka ah oo aad kadinkaaga ku xiratay:

- Ka dib markaad sameyso diiwaangelinta qoyskaaga, ku noqo bogga hore ee COVID Connect 2 oo ku soo gal Username (Summaddaada) and Password (Furehaaga).
- Eeg qeybta hoose ee bogga si aad u aragto inta kadin ee ku xiran kadinkaaga.



Sidee baa la ii soo ogeysiinayaa natiijada baarista?

Marka ay natiijooyinkaagu diyaar yihiin, waxaa lagugu soo ogeysiin doonaa farriin boostada internetka ah iyo/ama farriin taleefan oo qoran oo waxay ku xiran tahay noocii ogeysiinta ee aad dooratay markii aad is-diiwaangelineysay.

Eegista natiijooyinka baaristii qoyskaaga:

Ka dib markaad soo gasho kadinkaaga, guji “Test Results” (Natiijooyinka Baarista) ee ku qoran qeybta kore ee bogga si aad u aragto natiijooyinka qoyskaaga markay diyaar yihiin.

Inta uu sii jiro xanuunka faafaya ee COVID-19, waxaa muhiim ah in ay jiraan dedaallo ah baaris, in is gooni yeelo iyo karantiilid si loo Stop the Spread (Joojiyo Faafidda) xanuunka.

Si aad u hesho goobaha tallaalka COVID-19 ee deegaankaaga, booqo [Vaccines.gov](https://www.vaccines.gov), ama soo garaac 211 ama 877-947-2211. Si aad u hesho macluumaadkii ugu dambeeyey ee jawaabta Wisconsin COVID-19, booqo bogga COVID-19 ee Department of Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka).